# Codsiga Deeqda Aasaasiga ah ee Xasillinta Daryeelka Ilmaha Abriil 2022

Haddii aad rabto in lagaa caawiyo buuxinta codsigan, fadlan kala xiriir
Ha'yadda Ka Warhayso Daryeelka Ilmaha (Child Care Aware ee Minnesota) lambarka 651-290-9704.

**Ma u baahan tahay kaalmada luuqad aan Ingiriisi ahayn?**

Si necesita ayuda para comprender esta carta, comuníquese con Rocio Sosa, rsosa@thinksmall.org, 651-641-6660

Hadaad ubaahantahay caawimaad fahanka warqadan, fadlan la xiriir Abdulkadir Warsame, awarsame@thinksmall.org, 651-641-6673

Yog tias koj xav tau kev pab nkag siab tsab ntawv no, thov hu rau Julie Yang at JYang@thinksmall.org, 651-366-6792

**Buuxinta Codsigan**

Maadaama aad tahay ruqsad haystaha barnaamijka Daryeelka Ilmaha ee Qoyska ee DHS Sharciyeeyaan oo aadan awoodin inaad codsigaga ku soo gudbiso onlaynka, codsigan warqadda ah ayaa laguu diyaariyay si aad u codsato Deeqaha Xasillinta Daryeelka Ilmaha ee Abriil 2022. Codsigan waxaa ku jira marqaati kac ku yaala boggaga 7-8. Codsiga iyo marqaati kaca waa in la saxiixaa oo loo soo diraa hay'adda Ka Warhayso Daryeelka Ilmaha ee Minnesota:

Child Care Aware of Minnesota
10 River Park Plaza, Suite 820
Saint Paul, MN 5510

**Codsiyada waa in ciwaanka boostada lagu soo qoraa ugu dambayn Abriil 28, 2022.**

Waxaad u baahan doontaa Lambarka Macluumaadka Loo-shaqeeyahaaga ee Dawladda Dhexe (FEIN) ama Lambarka Sugnaanta Bulshada (SSN) midkood ee loogu talagalay ruqsad haystaha si aad u buuxiso codsigan.

**OGOW:** Su'aalaha oo dhan waa in laga jawaabo. Fadlan hubi inaad ka jawaabto dhammaan su'aalaha si aad u hubiso in codsigaaga la socodsiin karo.

**Macluumaadka Codsadaha ee Barnaamijka**

1. **Magaca barnaamijka ruqsadda loo haysto sida uu uga muuqdo shahaadada ruqsadda barnaamijka:**

   ______________________________________________________________________________

2. **Barnaamijkaagu ma ka haystaa ruqsad Waaxda Adeegyada Aadanaha ama Qabaa'ilka Asalka ah?**

   ____ Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota

   Lambarka ruqsadda Waaxda Adeegyada Aadanaha siduu uga muuqdo shahaadada ruqsadda barnaamijka (lambarka 6 ama 7 god ah): _________________

   ____ Qabaa'ilka Asalka ah

*Tixraacyada ku jira codsigan ee "barnaamijkaaga" waa barnaamijka la xiriira lambarka ruqsadda ee ku jira su'aasha #2.*

3. **Ciwaanka goobta barnaamijka** __________________________________________________
4. **Magaalada goobta barnaamijka:** ______________________________________________________
5. **Koodhka ciwaanka ee goobta barnaamijka:** _______________________________
6. **Gobolka ay goobta barnaamijka ku taal:** ____________________________________________________

**Macluumaadka Wakiilka Barnaamijka**

7. **Magaca buuxa ee sharciga ah ee ruqsad haystaha barnaamijka:**

   ______________________________________________________________________________

8. **Ciwaanka iimaylka ee ruqsad haystaha barnaamijka (Haddii aad ku guuldaraysato inaad bixiso ama aadan lahayn ciwaan iimayl, ma heli doontid iimaylka xaqiijinaya codsigaga la dhammeystiray. Si kastaba ha ahaatee, jawaabahaaga weli diiwaan ayaa la gelin doonaa):**

   ______________________________________________________________________________

9. **Lambarka telefoonka ee ruqsad haystaha barnaamijka:**

   ______________________________________________________________________________

Tusaale

**Su'aalaha Codsiga**

10. **Barnaamijkaagu ma shaqaynayey oo u adeegayey carruurta intii lagu jiray March 15, 2022 ilaa Abriil 14, 2022 xilliga maalgelinta?**
    - ☐ Haa
    - ☐ Maya
11. **Maxay ahayd diiwaangelintaada da'aad kasta toddobaadka caadiga ah laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?**
    - Tirada Dhallaanka ee soo xaadirtay wax ka yar 30 saacadood ___________
    - Tirada Dhallaanka ee soo xaadirtay 30 saacadood ama ka badan toddobaad kasta ___________
    - Tirada Dhallaanka ee soo xaadirtay in ka yar 30 saacadood toddobaad kasta ___________
    - Tirada Dhallaanka ee soo xaadirtay 30 saacadood ama ka badan toddobaad kasta ___________
    - Tirada Ardayda Dugsi-horaadka ee soo xaadirtay wax ka yar 30 saacadood toddobaad kasta ___________
    - Tirada Ardayda Dugsi-horaadka ee soo xaadirtay 30 saacadood ama ka badan toddobaad kasta ___________
    - Tirada Ardayda Da' Dugsiyeedka Gaartay ee soo xaadirtay 30 saacadood ama ka badan toddobaad kasta ___________
    - Tirada Ardayda Da' Dugsiyeedka Gaartay ee soo xaadiray 30 saacadood ama ka badan toddobaad kasta ___________

Abaalmarinta Deeqda Aaasaasiga waxaa la xisaabiyaa iyadoo lagu salaynayo tirada shaqaalaha waqti-buuxa ee u-dhigma (FTE) ee sida joogtada ah u daryeela carruurta ku jirta barnaamijkaaga.

12. **Ma tahay qofka kaliya ee si joogto ah u daryeela carruurta ku jirta barnaamijkaaga?**
    - ☐ Haa
    - ☐ Maya
13. **Haddii aad uga jawaabtay Maya su'aasha 12:**
    - **Immisa qof, <u>oo aadan adiga ku jirin</u>, ayaad shaqaalaysiisay waqti-buuxa iyo waqti-dhiman labaduba kuwaasoo si joogto ah u daryeela carruurta laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?**

      ____________________
14. **Immisa saacadood <u>ayaad ka shaqaysay</u> daryeelka carruurta laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?** ______________
15. **Haddii aad muujisay inaad shaqaalaysiisay dad waqti-buuxa ama waqti-dhiman oo ku jira barnaamijkaaga, qor dhammaan shakhsiyaadka (xarfaha hore ee magacyadooda oo keliya) barnaamijkaagu shaqaalaysiiyay si ay si joogto ah u daryeelaan carruurta iyo tirada saacadaha uu mid kasta ka shaqeeyo daryeelka carruurta laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?**

    Shaqaalaha 1: ________________ Saacadaha shaqada laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022 ______________
    Shaqaalaha 2: ________________ Saacadaha shaqada laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022 ______________
    Shaqaalaha 3: ________________ Saacadaha shaqada laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022 ______________
    Shaqaalaha 4: ________________ Saacadaha shaqada laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022 ______________
    Shaqaalaha 5: ________________ Saacadaha shaqada laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022 ______________
    (hoos ku qor shaqaalaha dheeraadka ah haddii loo baahdo)

**OGOW: HADDII AAD TAHAY SHAQSIGA KALIYA EE KU JIRA BARNAAMIJKAAGA DARYEELKA LOOGU TALAGALAY CARRUURTA, U BOOD SU'AASHA 17**

16. **Maxay ahaayeen kharashaadka hawlwadeenada barnaamijka daryeelka ilmahaaga ee loogu talagalay shaqaalaha sida joogtada ah u daryeela carruurta laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?**
    $___________________

    * Kharashaadka hawlwadeenada ee loogu talagalay bixiyayaasha Daryeelka Ilmaha Qoyska waxaa ku jira caawiyeyaal kasta ama shaqaale kasta oo aad mushaar siiso iyo mushaarka aad adigu qaadato.

17. **Lacagaha deeqda xasillinta waxaa kaliya loo isticmaali karaa ujeedooyinka hoose. Ujeeddadee(ujeeddooyinkee) u isticmaashay ama qorsheynaysaa inaad u isticmaasho lacagaha deeqaha ee bishii hore? Fadlan xulo dhammaan kuwa lagu dabaqi karo.**
    - ☐ Kharashaadka shaqaalaha, dheefaha, mushaarka sare, iyo shaqaalaynta iyo habalka
    - ☐ Ka bixinta taageero lacagaha go'an ee caymiska iyo lacagaha waxbarashada ee qoysaska ka diiwaangashan barnaamijka bixiyaha, ilaa inta suurtogalka ah, iyo mudnaan siinta qoysaska ku dhibtoonaya inay bixiyaan nooc kasta oo lacag-bixin ah.
    - ☐ Lacagaha kirada ama amaahda guryaha, biyaha iyo korontada, dayactirka iyo dib-u-hagaajinta xarumaha, ama caymiska
    - ☐ Qalabka ilaaliyo shaqsiga, saadka iyo adeegyada nadiifinta iyo fayadhowrka, ama tababarka
    - ☐ Horumarinta xirfadeed ee la xiriirta caaddooyinka caafimaadka iyo badqabka
    - ☐ Iibsashada ama cusboonaysiinta qalabka iyo saadka si looga jawaabo COVID-19
    - ☐ Alaabaha iyo adeegyada lagama maarmaanka u ah in la joogteeyo ama dib loo bilaabo adeegyada daryeelka ilmaha
    - ☐ Taageerada caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo shaqaalaha

**OGOW: HADDII AAD TAHAY SHAQSIGA KALIYA EE KU JIRA BARNAAMIJKAAGA DARYEELKA LOOGU TALAGALAY CARRUURTA, U BOOD SU'AASHA 19**

**Ka-dhaafitaanka boqolkiiba 70 Deeqda Aasaasiga ah waxay kordhisay shuruudda magdhowga**

Bixiyayaasha qaadanaya Deeqda Aasaasiga ah ee Xasillinta wuxuu sharciga gobolka Minnesota ka doonayaa inay isticmaalaan ugu yaraan boqolkiiba 70 Deeqda Aasaasiga ah si ay u bixiyaan magdhow dheeraad ah, dheefaha, ama mushaarka sare ee loogu talagalay shaqaalaha mushaharka qaata oo dhan, iskood u shaqaystayaasha (sida bixiyaha daryeelka carruurta ee qoyska), ama qandaraaslayaasha madaxa-bannaan ee si joogto ah u daryeesha carruurta. Codsadayaashu waxay codsan karaan ka-dhaafitaanka shuruuddan haddii aysan kordhin karin magdhowga, dheefaha, ama mushaarka sare iyadoo ugu wacan tahay xannibaadaha lagu daray heshiisyada lala yeeshay qaybaha gorgortanka shaqaalaha, ama haddii barnaamijku uu la kulmayo dhibaato dhaqaale oo aan caadi ahayn oo weyn.

18. **Miyaad codsanaysaa ka dhaafid shuruuda ah in aad isticmaasho ugu yaraan boqolkiiba 70 ee Deeqaha Saldhigga si aad u bixiso magdhow kordhay, dheefaha ama mushaharka premiomka ee muddadan deeq-lacageedka?**
    - ☐ Haa
    - ☐ Maya

**Hadday haa tahay:**

**Waa maxay sababta aasaasiga ah ee loo codsado ka-dhaafitaan si loo isticmaalo ugu yaraan boqolkiiba 70 Deeqda Aasaasiga ah si loo bixiyo magdhow dheeraad ah, dheefo, ama mushaarka sare ee loogu talagalay shaqaalaha mushaharka qaata oo dhan, iskood u shaqaystayaasha (sida bixiyaha daryeelka carruurta ee qoyska), ama qandaraaslayaasha madaxa-bannaan ee si joogto ah u daryeesha carruurta?**

- ☐ Xannibaadaha waxaa lagu daray heshiisyada lala yeesho qaybaha gorgortanka shaqaalaha
- ☐ Xiridda COVID-19 ee Loo Baahan Yahay
- ☐ Diiwaangelinta Hoose
- ☐ Qoysaska aan awoodin inay bixiyaan kharashka waxbarashada
- ☐ Biilasha dayactirka/dib-u-hagaajinta lama filaanka ah ee muhiimka ah
- ☐ Wax kale (sharrax sababta kale) ___________________________________________

**Muxuu ahaa dahkligaaga barnaamijka daryeelka ilmaha laga bilaabo Maarso 1, 2022 ilaa Maarso 31, 2022?** $_______________

**Heshiiska Aqbalaadda Shuruudaha Lacag-bixinta iyo Maalgelinta**

Ka shuruud ahaan helitaanka Deeqda Aasaasiga ah ee Xasillinta Daryeelka Ilmaha, waa inaad muujisaa inaad ka warqabto oo aad u hoggaansantahay shuruudda in barnaamijkaagu sii shaqaynayay oo u adeegayay carruurta ilaa muddada maalgelinta (Maarso 15, 2022 ilaa Abriil 14, 2022). "Shaqaynaya" waxaa loola jeedaa in barnaamijkaagu leeyahay shaqaale u diyaar ah daryeelka loogu talagalay carruurta haddii sidaas ay codsadaan qoysaska diiwaangashan ama qoysaska raba inay iska diiwaangeliyaan barnaamijkaaga, inta lagu gudajiro saacadaha barnaamijkaagu ruqsada u haysto inuu shaqeeyo iyo ilaa xad mugga barnaamijkaagu ruqsadda u haysto, waana in si cad loo sheego inuu u furan yahay qoysaska waqtigan codsanaya iyo kuwa raadinayaan.

Marka codsigaaga la helo oo la go'aamiyo in barnaamijkaagu u qalmo inuu helo lacagaha, waxaad heli doontaa ogeysiin maalgelin waxaadna heli doontaa lacag-bixinta bishaas.

Haddii ay jirto wax muujinaya inaad ku guuldarraysatay inaad buuxiso shuruudaha la xiriira Deeqaha Aasaasiga ah ee Xasillinta Daryeelka Ilmaha, waxaad heli doontaa ogeysiis qoraal ah waxaana lagu siin doonaa fursad aad ku caddayso iyo/ama ku saxdo wax kasta oo u-hoggaansanaan la'aan ah. Ku guuldareysiga in la sameeyo sixitaanada la iska rabo, ama siinta macluumaad been-abuur ah ama marin habaabin ah Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota (DHS) ee la xiriirta shuruudaha maalgelinta, waxay keeni kartaa joojinta lacag-bixinta mustaqbalka, dib u soo ceshadka lacagaha horay loo bixiyay, iyo/ama u gudbinta Xafiiska Kormeeraha Guud ee DHS si loo qaado tallaabo dheeraad ah oo la xiriirta lacagaha, heerka bixiyaha Barnaamijka Kaalmada Daryeelka Ilmaha, iyo ruqsadaada, shahaadadaada, ama diiwaangelinta sida ku cad Xeerarka Minnesota, cutubyada 119B, 245A, 245E, 245H, iyo Xeerarka Minnesota, qeybta 245.095.

19. **Barnaamijkaagu ma u aqbalaa lacag-bixinta Deeqda Aasaasiga ah ee Xasillinta Daryeelka Ilmaha ujeeddooyin la bixiyay oo barnaamijkaagu ma waafaqsan yahay inuu buuxiyay shuruudaha maalgelinta?**
    - ☐ Haa
    - ☐ Maya

**Macluumaadka Cashuurta ee La Iska Rabo** (La iska rabo waa haddii aad ogolaatay inaad aqbashay lacagaha ku jira su'aasha sare)

Si aad u bixiso oo aad boostada ugu soo dirto lacag-bixintaada, waa inaad bixisaa Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) ee loogu talagalay barnaamijka ee la xiriira Lambarka Ruqsadda ee codsadahan ee wata magaca ganacsi ee la xiriira AMA Lambarka Sugnaanta Bulshada ee Ruqsad Haystaha ee wata Magaca hore iyo kan dambe ee sharciga ah ee la xiriira. Macluumaadkan waxaa loo isticmaali doonaa in la soo saaro Foomka 1099 ujeeddooyin canshuureed awgood:

20. **Barnaamijkaagu ma leeyahay Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe?**
    - ☐ Haa
    - ☐ Maya (Hadday maya tahay, u gudub su'aasha 23)

21. **U bixi Magaca Ganacsi ee barnaamijkaaga sida uu uga muuqdo foomkaaga W-9 ama dukumentiyada kale ee canshuurta ee dawladda dhexe:**

    ________________________________________________________________

22. **Bixi lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) ee loogu talagalay barnaamijkaaga. Lambarka Aqoonsiga Loo-shaqeeyaha ee Dawladda Dhexe (FEIN) waa inuu u dhigmaa magaca ganacsi ee ku jira su'aasha 21 ee sare. FEIN waa inuu u qornaado qaabka XX-XXXXXXX ama XXXXXXXXX:**

    ___________________________________________________

***Kaliya ka jawaab su'aalaha 23 ilaa 25 haddii aad kaga jawaabtay "maya" su'aasha 20.***

23. **Bixi magaca Ruqsad Haystaha ee ugu HORREEYA ee sharciga ah ee loogu talagalay barnaamijkaaga. Hal magac oo kaliya ayaa loo baahan yahay haddii ay jiraan ruqsad haystayaal badan:**

    ___________________________________________________

24. **Bixi magaca ugu DAMBEEYA ee qofka ruqsada haysta ee barnaamijkaaga. Hal magac oo kaliya ayaa loo baahan yahay haddii ay jiraan ruqsad haystayaal badan:**

    ___________________________________________________

25. **Bixi Lambarka Sugnaanta Bulshada ee Ruqsad Haystaha ee loogu talagalay barnaamijkaaga. Hal lambar oo keliya ayaa loo baahan yahay haddii ay jiraan ruqsad haystayaal badan. Lambarka Sugnaanta Bulshada waa inuu u dhignaa magacyada laga helo su'aalaha 23 iyo 24. Lambarka Sugnaanta Bulshada waa inuu u qornaado qaabka XXX-XX-XXXX ama XXXXXXXXX:**

    ________________________________________

Tusaale

**Marqaati Kaca**

Si aad ugu qalanto inaad codsato oo aad u hesho Deeqda Aasaasiga ah ee Xasillinta Daryeelka Carruurta, barnaamijkaaga, hadda kadib loogu yeeri doono "barnaamijkayga" ayaa ka marag kici doonaan oo oggolaan doonaan waxyaabaha soo socda:

- Barnaamijkaygu wuxuu u shaqaynayay oo u adeegayay carruurta inta lagu gudajiray xilligii u-qalmitaanka maalgelinta (Maarso 15, 2022 ilaa Abriil 14, 2022).

- Barnaamijkaygu wuxuu oggolaaday in loo isticmaalo lacagahaan mid ama in ka badan ujeeddooyinka soo socda:
    - Kharashaadka shaqaalaha, macaashyada, mushaarka sare, iyo shaqaalaynta iyo haysashada
    - Lacagaha kirada ama amaahda guryaha, biyaha iyo korontada, dayactirka iyo dib-u-hagaajinta xarumaha, ama caymiska
    - Qalabka ilaaliyo shaqsiga, saadka iyo adeegyada nadiifinta iyo fayadhowrka, ama tababarka
    - Horumarinta xirfadeed ee la xiriirta caaddooyinka caafimaadka iyo badqabka
    - Iibsashada ama cusboonaysiinta qalabka iyo saadka si looga jawaabo COVID-19
    - Alaabaha iyo adeegyada lagama maarmaanka u ah in la joogteeyo ama dib loo bilaabo adeegyada daryeelka ilmaha
    - Taageerada caafimaadka maskaxda ee carruurta iyo shaqaalaha
    - Dib-u-bixinta mid kasta oo u isticmaalida waxyaabaha kor ku xusan, la bixiyay intii u dhaxaysay Janaayo 31, 2020 iyo Sitembar 30, 2023, taasoo aan horay looga bixinin lacagaha kale dawladda dhexe, gobolka, qabiilka ama lacagaha kale dadweynaha.

- Barnaamijkaygu wuxuu oggolaanayaa:
    - markuu furan yahay oo bixinayo adeegyada, dhaqangelinta siyaasadaha waafaqsan hagista iyo amarrada loogu talagalay gobolka, dhulalka, qabiilka, iyo maamulada deegaanka iyo, ilaa xadka ugu badan ee suurtagalka ah, hagista Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) (laga heli barta karo https://www.cdc.gov/coronavirus/2019-ncov/community/schools-childcare/index.html).
    - bixinta ugu yaraan isla qaddarta mushaarka toddobaadlaha ah iyo joogteynta macaashyada la midka ah (sida caymiska caafimaadka iyo hawlgabka, haddii la dabaqi karo).
    - Isticmaalida ugu yaraan boqolkiiba 70 Deeqda Aasaasiga ah si loo siiyo magdhow, dheefo, ama mushaarka sare ee la kordhiyay shaqaalaha mushaarka qaata oo dhan, iskood u shaqaysatayaasha (sida bixiyaha daryeelka carruurta ee qoyska), ama qandaraaslayaasha madaxa-bannaan ee si joogto ah u daryeelaan carruurta, haddii ka-dhaafitaan laga helo DHS mooyee.
    - ka bixinta taageero lacagaha go'an ee caymiska iyo lacagaha waxbarashada ee qoysaska ka diiwaangashan barnaamijkayga, ilaa inta suurtogalka ah, iyo mudnaan siinta qoysaska ku dhibtoonaya inay bixiyaan nooc kasta oo lacag-bixin ah. Haddii bixiyuhu uusan awoodin inuu ka bixiyo taageero lacagaha go'an ee caymiska iyo lacagaha waxbarashada ee loogu talagalay qoysaska ku jira barnaamijka oo dhan, waa inay mudnaanta siiyaan inay sidaas u sameeyaan qoysaska aadka ugu baahan taageerada.
    - ka warbixi/cusbooneysii macluumaadka mugga barnaamijka, ugu yaraan lixdii todobaadba mar, iyadoo loo marayo qalabka Cusbooneysiinta Ganacsi ee Bixiyaha ee ku jira barta https://mnpbu.naccrraware.net/#!/login. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan shuruudahan, fadlan tixraac Su'aalaha Inta Badan la Isweydiiyo.

- Barnaamijkaygu **MA** oggolaanayo in:
    - si aan ikhtiyaari ahayn shaqada looga cayriyo ama shaqada looga joojiyo shaqaalaha.
    - loo isticmaalo lacagahaan in lagu bixiyo canshuur, marka laga reebo canshuurta mushaar-bixinta.
    - loo isticmaalo lacagahaan alaabaha ay horay lacagtooda ay u bixiyeen dawladda dhexe, gobolka, qabiilka iyo/ama maalgelinta deegaanka ee guud.

**Muddada Maalgelinta iyo Muddada Marqaati Kaca**

Waan fahamsanahay haddii barnaamijkayga la go'aamiyo inuu u qalmo, in lacagaha hal mar la bixin doono iyo in marqaati kacaan loogu talagalay muddada Maarso 15, 2022 ilaa Abriil 14, 2022 .

**Wadaagista Xogta**

Waan fahamsanahay in markaan saxiixo heshiiskan, aan u oggolaanayo Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota inay macluumaadka la wadaagto hay'adaha lagula jiro qandaraaska iyo danwadaagta kale ee hay'adaha gobolka ujeeddooyinka soo socda awgood, si:

- Loo socodsiiyo geedi-socodka codsiga maalgelinta .
- Loo falanqeeyo xogta isticmaalka lacagaha
- Loo falanqeeyo waxtarka geedi-socodka bixinta Barnaamijka Deeqaha Xasillinta Daryeelka Ilmaha.

Waan fahamsanahay in macluumaadka aan soo gudbiyay ee ku jira codsigan loo tixgeliyo inuu yahay mid guud, haddii suurtogal tahay in lagu aqoonsado carruurta ku jirta barnaamijkayga mooyee ama haddii loo tixgeliyo inay xog u gaar ah shakhsiga, sida lambarka telefoonka, ciwaanka iimaylka, lambarka sugnaanta bulshada, ama xogta kale ee loo sifeeyay. inay gaar tahay sida ku cad Xeerka Habdhaqanada Xogta Dawladda ee Minnesota.

**Qeybinta Lacag-bixinta**

Marka la xaqiijiyo u-qalmitaanka, lacag-bixin ayaa loogu diri doonaa ruqsad haystaha ciwaanka ku qoran su'aalaha 3-5.

Bixiyuhu wuxuu heli karaa 10% gunno ah hadduu helay lacag-bixin-ta(nada) loogu adeegayo carruurta ka qaybqaadanaysa barnaamijyada CCAP ama Deeqaha Waxbarasho ee Carruurnimada Hore (ELS) inta lagu gudajiro labada xilli lacag-bixin ee bilaabmaya Disembar 27, 2021 oo dhammaanaya Janaayo 23, 2022.

Tusaale

**Saxiixa**

Waxaan ka marqaati kacayaa oo aan cadeynayaa in macluumaadka kor lagu soo sheegay uu yahay mid run ah oo sax ah. Waan fahamsanahay in haddii aan si ula kac ah u soo gudbiyo macluumaad been-abuur ah ama been ah inta lagu gudajiro geedi-socodka codsiga deeqda ama wixii ka dambeeya, oo ay ku jirto marqaati kaca, barnaamijkaygu ma sii ahaan doono mid u-qalmi doona maalgelinta mustaqbalka waxaana laga yaabaa in lagu soo rogo ciqaab dembiyeed iyo ganaax madani ah, oo ay ku jiraan balse aan ku xaddidnayn dib-u-gudida lacagaha horay loo helay.

Fadlan saxiix oo taariikh ku qor qaybta hoose

Saxiixa: ____________________________________________________________

Taariikhda la saxiixay: ___________________________________________________________

Tusaale